# Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo (FAQ) King County Housing Authority 2020 Qaybta 8 Liiska Sugayaasha

Waxaanu rajaynaynaa in FAQ ay ka jawaabi doonaan wixii su'aalo ah ee aad hayso ee ku saabsan dalbashada Bakhtiyaa Nasiibka King County Housing Authority 2020 Qaybta 8 (Fagtuurka Ikhtiyaarka Guryaynta) Liiska Sugayaasha. Hadii aanad ka helin jawaabta su'aashaada halkan, fadlan kala hadal xafiiska Qaybta 8 206-214-1300 Isniin ilaa Jimce 9 subaxnimo ilaa 4 galabnimo.

## Bakhtiyaa Nasiibka Liiska Sugayaasha Qaybta 8

**Goorma ayuu furmayaa Bakhtiyaa Nasiibka Liiska Sugayaasha Qaybta 8 ?**
Waxa uu furmayaa 7:00 Subaxnimo Febraayo 12, 2020 oo waxa uu xidhmayaa 4:00 Febrraayo 25, 2020.

**Imisa dalbade ayaa la aqbalayaa?**
Dhamaan arjiyada lasoo gurbiyo Qaybta 8 inta u dhaxaysa taariikhda iyo saacadaha kor lagu sheegey ee u qalma waa la aqbalayaa (waxaana qoyskiiba loo ogol yahay hal arji). Eeg U Qalanka Qaybta 8 wixii macluumaad dheeraad ah.

**Hadii aan buuxiyo arjigan, ma waxaad heli doonaa Fagtuurka Qaybta 8?**
Buuxinta arjigu ma damaanad qaadayso in aad heli doonto fagtuurka Qaybta 8. Arjigaaga waxaa la gelin doonaa koox arjiyo ah kuwaas oo aanu uga soo dooranayo si bakhtiyaa nasiib ah 2,500 oo qoys kuwaas oo la gelin doona liiska sugayaasha fagtuurada. Sidoo kale, si aad u hesho fagtuurada, qoyskaagu waa inuu u qalmaa Qaybta 8. Eeg U Qalanka Qaybta 8 wixii macluumaad dheeraad ah.

**Goorma ayaan ogaanayaa in la i geliyay liiska sugayaasha?**
Waxaanu kugula socodsiin doonaa iimeel ahaan, fariin qoraal ah, ama warqad si aanu kuugu sheegno hadii si bakhtiyaa nasiib loogugu soo xulay inaad gasho liiska cusub ee sugayaasha. Wargelinta waxaa laguu soo diri doonaa Maarso 31. Sidoo kale waxaad ka eegi kartaa https://www.kcha.org wixii macluumaad ah ee ugu danbeeya ee nidaamka xulashada. Fadlan nala soo xidhiidh hadii aanad helin iimeelka, fariin qoraal ah, ama warqad ugu danbey Maarso31.

**Sideen ugu sheegayaa KCHA hadii macluumaadkayga xidhiidha uu isbadaley kadib marka aan arjiga soo gudbiyo?**
Waa inaad badashaa macluumaadkaaga xidhiidhka **kadib mudada arjiga,** waxaad ku badali kartaa online ahaan kcha.org ama boos**:**

KCHA
Attention: Section 8 Applications
700 Andover Park West

Tukwila, WA 98188

U sheeg KCHA **sida ugu dhakhsaba badan** hadii ay jiraan wax isbadal ah oo macluumaadkaaga xidhiidhka ku yimaadey (sida taleefan lambarkaaga, cinwaankaaga boosta, ama cinwaankaaga iimeelka).

## Dalbo Bakhtiyaa Nasiibka Liiska Sugayaasha Qaybta 8

**Sidee loo dalbanayaa Bakhtiyaa Nadiibka Liiska Sugayaasha Qaybta 8?**
Marka la furo bakhtiyaa nasiibka, waxaad ka heli doontaa linkiga arjiga https://www.kcha.org/lottery, kaas oo aad gayn karto WaitListCheck.com. Arjiga waxaa **kaliya lagaga shaqeeyaa online ahaan.** Ma jiraan wax arji ah oo waraaqo ahi.

**Ma jirtaa wax kharash ah oo la iska doonayaa dalbashada?**
**Maya. Dalbashada barnaamijka Qaybta 8 waa bilaash.** Hadii lagu waydiiyo lacag, markaa **kuma** jirtid websaytyada King County Housing Authority ama WaitListCheck. **Kaliya** dariiqa lagu soo gudbin karaa arjiga Bakhtiyaa Nasiibka Liiska Sugayaasha ee Qaybta 8 waa in la galo linkiga WaitlistCheck oo laga heleyao kcha.org/lottery.

**Macluumaad noocee ah ayaan u baahanahay si aan u dalbado arjiga?**
Waxaanu ku waydiin doonaa macluumaadka soo socda arjigan.

- Xubin kasta oo qoyskaaga ah:
  - Magaca
  - Xidhiidhka idinka dhaxeeya
  - Taariikhda dhalashada
  - Lambarka Amniga Bulshada (hadii ay munaasab ku tahay)
  - Qoomiyada
- Dakhliga bishii ee qoyska (oo ay ku jiraan dakhliga mushaharka, dakhliga gunooyinka, gunooyinka laxaad la'aanta, biilka caruurta, iwm.). Waa inaad sidoo kale bixisaa macluumaadka xidhiidhka cida aad u shaqayso, hadii ay munaasab ku tahay.
- Macluumaadka ku saabsan xaalada guryayntaada wakhtigan (sida halka aad degan tahay iyo inta aad kirada ku bixiso iyo adeegyada).
- Macluumaadka xidhiidhka (iimeel, taleefan, cinwaanka) si markaa KCHA ay kuugu sheegi karto natiijada bakhtiyaa nasiibka.

**Ma waxaan u baahanahay cinwaan iimeel si aan u dalbado?**
Maya. Waxaad isticmaali kartaa cinwaan iimeel ama lambarka taleefanka si aad u samaysato xisaabtaada WaitListCheck oo aad u buuxiso arjiga. **Waxaanu aad ugu talinaynaa** in aad bixiso cinwaan iimeel oo macluumaadkaaga xidhiidhka ah, maadaama oo kani yahay dariiq la isku halayn karo oo lagugula soo xidhiidhayo. Hadii aanad lahayn cinwaan iimeel, waxaa jira ikhtiyaaro badan oo aad ku samaysan karto iimeel bilaash ah, oo ay ku jiraan Gmail, Yahoo Mail, iyo Outlook.

**Ma waxaan u baahanahay cinwaan rasmi ah si aan u dalbado?**
Maya. Waxaad u baahan tahay iimeel ama lambar taleefan si markaas aanu kuula soo xidhiidhi karno natiijada bakhtiyaa nasiibka. Hadii lagu geliyo liiska sugayaasha, waxaanu foomka kuugu soo diri doonaa boosta si aad u saxeexdo marka fagtuurku diyaar noqdo, markaa waxaa soo raacisaa boosta hadii aad awoodo. Hadii aanad wakhti xaadirkan lahayn cinwaan rasmi ah, waxaad ku nasiibin kartaa cinwaanka kuugu dhaw (isgoyska jidka) ama "Ku Munaasab Maaha".

**Ma waxaad u baahanahay Lambarka Amniga Bulshada si aan u dalbado?**
Ugu yaqaan **hal** qof oo qoyskaaga ah waa inuu haysaa Lambar Aminiga Bulshada oo sax ah si aad u dalbataan. Hadii qoyskaaga lagu soo xusho nidaamka bakhtiyaa nasiibka si laguu geliyo liiska sugayaasha fagtuurka, waxaad u baahan tahay inaad kusoo lifaaqdo Lambarka Amniga Bulshada (Social Security Number - SSN) ee dhamaan xubnaha qoyskaaga - ama waraaqaha xubnaha ee aan la siinin SSN - kahor inta aanad helin fagtuurka.

**Sidee ayaan ku ogaanaa hadii aan si wanaagsan usoo gudbiyay arjiga?**
Marka aad dhamayso ee aad gudbiso arjiga onlineka ah, xaalada arjigaaga ee WaitListCheck ayaa noqon kartoo "Submitted (La Gudbiyay)". Lambarkan ayaa xaqiijin doona in arjigaagii la heley. Hadii aanad dhamaystirin arjigaaga, dib ayaad u geli kartaa WaitListCheck si aad u dhamaystirto kahor inta aanay dhamaan mudada arjigu.

**Taariikhda/saacada arjigaygu ma waxay saamayn kartaa fursadayda in la ii soo xulo liiska sugayaasha?**
Maya. Maadaama oo aanu adeegsanayno bakhtiyaa nasiibka si aanu usoo doorano qoysaska, qof kasta oo dalbaday waxa uu leeyahay fursad isku mid ah oo lagusoo xulanayo liiska sugayaasha. Ilaa inta aad ku dalbatay mudada arjiga, **goorta aad dalbataa ma saamayn doono fursadaada in laguu xulo liiska sugayaasha.**

## Kaalmada Dalabka

**Sidee ayaan ula xidhiidhayaa KCHA hadii aan u baahdo in la iga caawiyo arjiga?**
Hadii aad u baahato kaalmo, waxaad kala hadashaa xafiiska Qaybta 8 206-214-1300 Isniin ilaa Jimce laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 4 galabnimo. Maadaama oo taleefanado badan ay nagu soo dhacaan inta lagu jiro nidaamka arjiga, fadlan noo samir. Waxaanu ka jawaabi doonaa su'aalahaaga sida ugu dhakhsaha badan.
**Oggow:** Waxaanu filanaynaa inay nala soo hadlaan dad badan dhawrka maalmood ee ugu horeeya mudada arjiga, markaa waxaa dhici kartaa in ay raagto in lagaa caawiyaa arjigaaga ilaa inta laga gaadhayo wakhtiyada danbe ee mudada arjiga. Fadlan xasuuso in **marka** aad dalbato **ayna** saamaynaynin in lagu geliyo liiska.

**Ma heli kombuyuutar. Halkee ayaan online ahaan ka dalban karaa?**
Waxaad isticmaali kartaa kombuyuutar kasta, taleefanka gacan ee casriga ah, ama aalada internetka ku xidhiidhsami kara si aad u dalbato. **King County Library System** (https://www.kcls.org) iyo **Seattle Public Library** (https://www.spl.org) waxay heeliyihiin kombuyuutaro si bilaash ah aad ku isticmaali karto si aad u dalbato. Inta lagu jiro mudada arjiga, KCHA waxa ay kuu diyaarin doontaa kombuyuutar aad isticmaasho oo ku yaal meelaha soo socoda (wakhti kalena eeg wixii meelo cusub ah):

- KCHA Central Office, 9 Subaxnimo–4 Galanimo (206-214-1300)
  700 Andover Park W, Tukwila, WA 98188 [maabka goobtab]

- Ballinger Homes, 9 Subaxnimo-4:15 Galabnimo (206-574-1243)
  2200 N.E. 201st Place, Shoreline, WA 98155 [maabka goobtab]

- Birch Creek, 9 Subaxnimo-4:15 Galabnimo (206-315-4360)
  27360 129th Place SE, Kent, WA 98030 [maabka goobtab]

- Seola Gardens, 9 Subaxnimo-4:15 Galabnimo (206-829-2465)
  11215 5th Ave. SW, Seattle, WA 98146 [maabka goobtab]

- Spiritwood Manor, 9 Subaxnimo-4:15 Galabmimo (206-315-4380)
  1424 148th Ave. SE, Bellevue, WA 98007 [maabka goobtab]

**Arjiga malagu heli karaa luuqad aan ahayn Ingiriisi?**
Arjigu waxa uu noqon doonaa Ingiriisi, waxaa jira ikhtiyaarka Google Translate in loo adeegsan karo si loogu turjunto. Waanu ognahay in Google Translate ayna wanaagsanayn, markaa hadii aad u baahan tahay in arjiga buuxintiisa lagaa caawiyo oo luuqad Ingiriisi aan ahayn, kala xidhiidh Xafiiska Qaybta 8 206-214-1300 Isniin ilaa Jimce 9 subaxnimo ilaa 4 galabnimo waxaanan markaa kuu diyaarin doonaa kaalmo luuqadaada ah.

## U Qalanka Qaybta 8

**Ma U Qalmaa Qaybta 8?**

Waxaa jira shan shuruudood oo aasaasi u ah fagtuurka Qaybta 8. Si aad ugu qalanto, waa inaad ka kaga jawaabtaa **haa** Su'aalaha 1-4 iyo **maya** Su'aasha 5 ee hoose:

1. Madaxa Qoyskaagu Ma Kawayn Yahay **18 sano jir?**
2. Qoyskaagu ma leeyahay **ugu yaraaan mid kamid ah** kuwa soo socda:
   - Qof **laxaad la'?**
   - Qof ah **62 jir ama kawayn?**
   - **Ilmo** kayar 18 sano jir?
3. Qoyskaagu ma kamid yahay qoysaska loo arji in **dakhlogoodu hooseeyaan?** "Dakhliga Hoose" waxa uu ka dhigan yahay wadarta dakhliga (dakhliga la helo kahor inta aan laga jarin wax cashuur ah ama wixii kale ee dayn ah laga jarin) inuu **yahay ma ka hoosee xadiga ku qoran shaxda hoose**.

| Cabirka Qoyska | Dakhliga sanadkii ee ah ama ka hooseeya |
|---|---|
| 1 qof | $61,800 |
| 2 qof | $70,600 |
| 3 qof | $79,450 |
| 4 qof | $88,250 |
| 5 qof | $95,350 |

| | |
|---|---|
| 6 qof | $102,400 |
| 7 qof | $109,450 |
| 8 qof | $116,500 |
| 9 qof | $123,550 |
| 10 qof | $130,650 |
| 11 qof | $137,700 |

4. Xaaladaha soo socdaa ma jirtaa **ugu yaraan hal** xaalad oo aad ku sugan tahay?
   - Miyaad **laadahay meel rasmi ha oo aad habeenkii degan tahay?** Tani miyay tahay; deganaansho banaanka ah, ku noolaansho hoyga kumeel gaadhka ah, ama inaad ku nooshahay gaadhigaaga.
   - Ma ku bixisaa **50% ama wax ka badan dakhliga qoyskaaga kiro iyo adeegyada aas aasiga ah** (sida laydhka, gaasta, biyaha, bulaacada, iyo qashinka)?
   - Ma waxay tahay inaad guurto maadaama oo ay ku haysato **tacadiga guriga dhaxdiisa, tacadi xidhiidh jacayl, daba gurid, tacadi galmo, ama tahriibin galmo**?
   - Ma waxay tahay inaad u guurto maadaama oo **aanad geli karin gurigaaga,** maadaama oo **ay jiraan masiibooyin dabiici ahi,** maadaaa oo **waxka qabad dawladeed,** ama aad dhibane u tahay **danbiga nacaybka?**
   - Ma waxaad wakhti xaadirkan ku nooshahay **guri baaba'ay ama aan badbaado lahayn?** Tusaale ahaan guriga burburay aam aan badbaado lahayni waa ka aan lahayn qasabado iyo bulaacado ama kulayliye munaasab ah.
   - Qoyskaagu ma kamid yahay qoysaska loo arji in **dakhlogoodu aad u hooseeyo?** "Dakhliga aadka u hooseeyaa" waxa uu ka dhigan yahay dakhliga sanadkii inuu yahay ama uu ka hooseeyo xadiga shaxda hoose:

| Cabirka Qoyska | Dakhliga sanadkii ee ah ama ka hooseeya |
|---|---|
| 1 qof | $23,250 |
| 2 qof | $26,600 |
| 3 qof | $29,900 |
| 4 qof | $33,200 |
| 5 qof | $35,900 |
| 6 qof | $38,550 |
| 7 qof | $41,200 |
| 8 qof | $43,850 |
| 9 qof | $47,850 |
| 10 qof | $52,270 |
| 11 qof | $56,690 |

5. Ma wakhti xaadirkan waxaad ku nooshahay miyaa guri dawladu ay kaabis ku samayso? **OGGOW:** Waxaa jira waxyaabo laga soo reebayo oo sharcigan ah, hoos ku sheeg. Waxaad weli u qalmi kartaa fagtuurka taas oo ku xidhan xaaladaada.
   - Hadii aad ku nooshahay guri kumeel gaadh ah, riix halkan.

- Hadii aad wakhtigan haysato fagtuurka Qaybta 8 ama aad ku nooshahay guryaha shacabka, riix halkan.

**Yaa u qalma ee aan dhalashada dalka haysan?**
Si aad u hesho Fagtuurka Qaybta 8, ugu yaraan **hal** xubin oo qoyska ah waa inay haysaa Dhalashada Maraykanka ama ay tahay qof dhalashada aan haysan oo u qalma. Wixii dadka muwaadiniinta ahayn ee aan u qalmay waa inay noqdaan dad haysa:

- Xaalada deganaanshaha rasmiga ah (sitaha giriin kaadhka)
- Xaalada deganaanshaha ku meel gaadhka ah (oo ayna ku jirin ardayda fiisayaasha haysa)
- La siiyay xaalada qaxootiga ama magan galyo doonka ee Department of Homeland Security
- La siiyay xaalada geliyaha soona galay kahor Abriil 1, 1980
- Inuu sharci noqdo maadaama oo uu Xeer Ilaaliyaha Guud ee gelin karo sababta ama wixii sabab ah ee loo arko in xadidaadeedu dano ugu jiraan shacabka
- In sharci la noqdaa maadaama oo Xeer Ilaaliyuhu uu mastaafurin karo maadaama oo nolosha iyo xoriyada uu khatar ku yahay

**Sidee ayuu arjigaaga u saamaynayaa xeerka dulsaarka shacabka ee Waaxda Aminiga ee Wasaarada Arrimaha Gudaha (Department of Homeland Security)?**
Waaxda Aminiga ee Wasaarada Arrimaha Gudaha (Department of Homeland Security) waxa ay soo gabo gabaysay xeer "dulsaarka bulshada" kaas oo badalaya qaabka sarkaalka laanta socdaalka ee markaa lagu ogaanayo hadii shakhsigu uu u qalmo inuu helo giriin kaadhka (ama in lasiiyo sharciga deganaanshaha rasmiga ah) ama oo soo galo Maraykanka. Sharciga dulsaarka bulshadu ma saamaynayo u qalankaaga kaalmada guryaynta. Laakiin, sida uu dhigayo sharciga cusub, arjiga ama helitaanka gunooyinka shacabka, oo ay ku jiraan Guryaynta Shacabka ama Qaybta 8 (Section 8) ee kaalmada guryaynta, kadib Febraayo 24, 2020, waxa kamid noqon kara tijaabada dulsaarka shacabka. Hadii aad wax su'aal ah ka qabto helitaankaaga gunada guryaynta inay saamayn ku yeelan karto xaaladaada soo galaytiga, waxaanu kugula talinaynaa inaad kala sheekeysato looyar soo galayti kaas oo yaqaan shuruucda.

**Waa maxay sharaxa qofka laxaadka la'i?**
Waxaa laguu aqoonsanayaa inaad laxaad la'adahay hadii mudo dheer ama si rasmi ah jidh ahaan ama maskixiyan aad laxaad la'dahay taas oo kugu adkaynaysa inaad qabato waxyaabaha soo socda:

- Inaad naftaada daryeesho
- Inaad qabato shaqooyinka gacanta laga qabanayo
- Inaad maqasho ama aragto wax
- Cunto
- Seexato
- Dhaqaaqa
- Xidhiidha
- Neefsiga
- Barashada
- Akhriska
- Soo Jeedka

- Fikirka
- Shaqada

Hadii aad qaadato Supplemental Security Income (Dakhliga Amniga Dheeraadka ah, SSI) ama Social Security Disability Income (Dhakhliga Laxaad La'aanta Amniga, SSDI), waxaa laguu arkaa inaad laxaad la'dahay marka la eego Fagtuurka Qaybta 8. Qaabka kale ee lagu xaqiijin karo laxaad la'aanta waxaa heli kara dadka aan qaaday SSI ama SSDI. Waraaqahan waxa ay kaliya loogu baahan yahay in ajirga la geliyo liiska sugayaasha fagtuurka.

**Waxaan ku noolahay kumeel gaadh ah. Ma dalban karaa?**
Haa. Maadaama oo guriga kumeel gaadhka ah loo arko **barmaamij wakhti xadidan** (waxaa jira wakhti loo qabtay inay qoysku kaga guuraan guriga), qoyskaaga looma arko "inay guri rasmi ah leeyihiin" oo markaa waxa ay u qalmayaan fagtuurka.

**Waxaan ku noolahay Guryaynta Shacabka Dakhliga Hoose ama waxaan hore ugu jiraan barnaamijka fagtuurka. Ma dalban karaa in la i geliyo liiska sugayaasha?**
Guud ahaan, hadii aad **wakhtigan ku jirto guryaynta shacabka ama aad ku jirto barnaamijka fagtuurka**, waxaa dhici kara **in aanad u qalmin** liiska sugayaasha

**Waxaad u qalmi kartaa liiska sugayaasha hadii** aad cadayso inaanad awoodin in aad kusii jirto gurigaaga wakhtigan maadaama oo ay jiraan kuwa soo socdaayi:

- tacadi guriga dhaxdiisa ahi
- guri aan badbaado ahayn iyo/ama la geli karin
- faldanbiyeed nacayb
- waxka qabasho dawladeed
- masiibo qaran

Hadii aad wakhti xaadirkan guri kaga jirto Guryaynta Shacabka ama barnaamijka fagtuurka oo aanad garanaynin inaad u qalanto inaad dalbato Qaybta 8, fadlan la hadal 206-214-1300.

**Ma inaad deganahaybaa Degmada King si aan ugu qalmo inaan dalbado?**
Maya. Qofka dalbanayaa maaha inuu ku noolaado Degmada King si uu u dalbado bakhyaa nasiibka. Waxay ku noolaan karaan meel kasta oo caalamka ah oo way dalban karaan. Fadlan ogsoonaw laakiin **hadii aanad** wakhtigan ku noolayn KCHA meel ay ka taliso, oo aanad qaadato fagtuurka Qaybta 8, waa **inaad ku noolaataa halkan sanadka kowaad ee aad barnaamika aad gasho.** Meesha ay ka taliso KCHA waa meel kasta oo Degmada King ah **marka laga tago aaga** xadidka magaalada ee Renton iyo Seattle, kuwaas oo ah Maamulo Guryaynta ah oo u gaar ah.

**Ma jiraan ikhtiyaaro kale oo guryayn ah oo la heli karaayi?**
Hadii aad doonayso macluumaad ku saabsan barnaamijyada kale ee kaalmada guryaynta, la hadal 2-1-1 ama booqo boqa khayraadka ee websaytka KCHA https://www.kcha.org/housing/resources/. Waa kuwan liis gaaban oo maamulada kale ee guryaynta ee dhawi:

- Seattle Housing Authority

- Renton Housing Authority
- Tacoma Housing Authority
- Pierce County Housing Authority
- Everett Housing Authority
- Housing Authority of Snohomish County